

SI BILAA LACAG AH U XERE CASHUURTAADA!

Ku hel kaalmo xeraynta cashuurta oo bilaa lacag ah onlayn adigoo ka helaya barta VITA (Volunteer Income Tax)!

Waxaad u qalmi kartaa dheefaha cashuurta fadaraalka sida Dheefta Cashuurta Dakhliga la Kasbaday (EITC) iyo Dheefta Cashuurta ee Ilmaha (CTC) iyo Dheefta gobolka sida Dheefta Cashuurta Dakhliga la Kasbaday ee California (CalEITC) iyo Dheefta Cashuurta Ilmaha Yar (Young Child Tax Credit, YCTC) kuwaasi oo lacag kugu soo celin kara. Cashuur diyaariyayaashayada lagu kalsoon yahay ayaa fiirin doono bal haddii aad u qalanto dheefo cashuur oo kale si aad u kordhiso lacagaha kuu soo laabanaya ama aad u yarayso cashuurta lagaa qaadayo. Noo oggolow inaanu kaa caawino inaad hesho lacagta aad u qalanto!

Waxa dhici karta inaad u qalanto kaalmada xeraynta cashuurta ee BILAA LACAGTA ah ee cashuur diyaariye khabiir ah.

Ayaa U Qalma?

Shakhsiyaadka/qoysaska, oo ay ka mid yihiin xeraystayaasha haysta Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha Qofka (ITIN), ee kasbada:

- **\$1- \$64,000 sanadkii ayaa** heli kara kaalmada cashuurta ee bilashka ah una qalmi kara inay dalbadaan dheefta cashuurta fadaraalka
- **\$1- \$30,950 sanadkii ayaa u** qalmi kara dheefaha cashuurta gobolka ah oo dheeraad ah

Waxaad U Baahan Doonto

- Aqoonsi sawir leh
- Kaarka Sooshiyaal Sikiyuuriti ama ITIN oo adiga iyo cidda aad ka masuulka tahay leeyihiin
- Dokumentiyada dakhliga oo uu ka mid yahay W2s ama 1099s
- Macluumaadka xisaabta bangiga oo lacagaha toos loogu shubi karo
- Bayaanada lacagta waxbarashada ama dulsaarka daynta ardayga
- Taariikhaha cayminta caafimaadka ee adiga iyo ciddii aad ka masuulka tahay

Sida Loo Xeraysto

- **Wac 2-1-1** ama booqo **myfreetaxes.org** si aad u ogaato haddii aad u qalanto una qabsato ballan.
- Adeegyada diyaarinta cashuurta waxa lagu heli karaa luuqado badan.
- Shakhsiyaadka u qalma waxay heli karaan kaalmo cashuur oo fool-ka-fool ah ama onlayn ayay bilaa lacag kaga xeraysan karaan barta myfreetaxes.org.



Wac 2-1-1 ama booqo **myfreetaxes.org** si aad wax badan u ogaato!

SAN DIEGO COUNTY
EITC
Earned Income Tax Credit
COALITION



Barnaamijkan waxa idiin diyaariyey Iskaashiga EITC ee Degmada San Diego iyo shurakada soo socda: